Cudurka Tiibishada Tuberkulos TBC



Waa qoraal ku saabsan cudurka Tiibishada oo ay soo diyaariyeen kooxda caafimaadka soomaaliyeed

En skrift från Somaliska Hälsoteamet om Tuberkulos TBC

Waa maxay qaaxo(tiibisho)?

Qaaxadu waa cudur laysku daarto laakiinse la daawayn karo, waxaana keena bakteeriyo loo yaqaan Mycobacterium Tuberculosis.

Gebi ahaan dadka lagu daarto bakteriyada tiibishada 10% ka mid ah ayaa jirada inta kalase hurgunka bakteeriyadu qofka jirkiisa ayuu oo isku nabaa (seexdaa). Cudurka aad dadka ugu dhaca waa hurgunka sambabda. Qaaxadu waxay ku dhici kartaa oo kale Lafaha, qanjirada, kilyaha iyo neerfayaasha.

Qofkee bay ku dhacdaa Qaaxadu?

Qof kasta way ku dhici karta haddaad la kulanto qof qaba tiibishada sambabda. Halis waxay u tahay ilmaha yar-yar iyo dadka awooda difaaca jirkoodu yar yahay, tusaale sida dadka qaba Hiv/aids-ka. Daawooyinka qaarkood waxay wax yeeleeyaan awooda jirku u lee-yahay ka hortagga cudurada, taasina waxay keeni kartaa inay kugu soo kacdo bakteeriyada tiibishada ee jirkaaga horey ugu jirtey. Waxaana dhici karta inaad waa hore qaaday hurgunka tiibishadaas oo bakteeriyadu huruday haddana hurdada ay ka kacday markay aragtay inuu jirkaagu daciifay.

Siddee bay caadi u tahay qaaxadu?

Meela badan ee dunida ayay qaaxadu caadi ka tahay loona arkaa inay waxyeelo ku hayso caafimaadka guud ee dadwaynaha. Laanta caafimaadka ee qaramada midoobay WHO waxay shaca ka qaaday inay dunida khatar ku hayso qaaxadu. Sedex meelood meel dadka dunida ku nool waxaa ku dhaca qaaxo. 20 meljan ee ka

mid ah dadkaas way qabaan cudurka, 2 meljanna way u dhintaan sanad walba.
Wadamada uu cudurka ka yahay caadi 100 000 qof ee kasta wuxuu ku dhacdaa qaaxadu 600 qof sanadkii. Dalkaan Iswiidhan cudurku wuxuu ku dhacaa 100 000 qof 5 qof. Waa tirada ugu yar markii loo eego aduunka. Waa-yahaan dambe waxaa soo kordhaya faafidda cudurku u ku faafayo dalka iswiidhan taaso ugu wacan tahay dadyowga qaxootiga ee soo galaya dalka

---

Sidee bay ku faaftaa qaaxadu?



Mas 1

Tibishada waxaa lagu kala qaada hawada la neefsado
- biyaha daruurta sido, daruurtaas oo wada bakteeriyada tiibishada oo qofu neefsado. Si laysu qaadsiiyo tiibishadu waxay doonaysaa inuu qofku qaba tiibisha bakteeriyo fir-fircoon leh iyo in muddo badan laysla joogo qol ama meel kooban. Inta badan qofku wuxuu ku daartaa qofka u dhow oo had iyo jeeraale isla joogaan, sida waalidka iyo ilmahooda. Caadi ma aha inuu qofku ka qaado meelaha uusan ku badneen sida meesha uu qofku ka shaqeeyo. TBC-da laguma kala qado cunnada,qalabka cunnada sida maacuunka ama qaadada, dharka iyo wixii la mid ah.

Waa maxay calaamdaha TBC-da lagu garto?

Calaamaadaha lagu garto TBC waxay soo baxaan muddo asbuucyo ah. Waxaa lagu aqoosdaa:

• qufac (socda in ka badan 3 asbuuc)
• dhiig ama xaako la qufaco (*phlegm* ka yimaada sambabada gudahood)
• xanuun shafka ah
• daal
• miisaan dhac
• xummad
• dhidid habeenkii

Caruurta waxaa lagu garta xumad badan, qanjira barar iyo neefta oo ku dhegta sida qof asma qaba oo kale.

TBC-da noocee baa la is-qaadsiiyaa?

Tiibishada sambabda ee dadka waa wayn ayaa la is-qaadsiiyaa. Ilmaha intaysan qaan gaarin ma qaadsiin karaan cudurkaan dad kale.waayoo weli sambabkooda uma samaysna sidii laysu qaadsiin lahaa nooca hurgunka tiibishada. Noocyada kale ee idil laysma qaadsiin karo.

Maxaa dhaca markuu qofka ku dhacdo TBC?

Markuu qofka ku dhaco cudurkaan waxaa la siiyaa daawo lagu daweeyo TBC-da. Waxaa lagu daweeya qofka isbitaalo qaabilsan cudurada qaaxada. Waxaa la daweeya 6 bilood.

Hadduu qofku qaba tiibishada nooca lay qaadsiiyo waa in laga ilaaliyaa dadka si uusan ugu daaran. Waxay qaadataa in la karantiina qofka ilaa laba isbuuc. Waa inuu joogaa gurigiisa ama meel isbitaal ah. Hadduu qofku iska daayo daawada ayadoo mudadii u dhammaan waxaa halis ah inay dib ugu soo noqdo cudurka.

Haddii la ogaado hurgunka qof qaaday laakiinse uusan ku dhicin qaaxo, waxaa laga maarmaan ah in loo

gargaaro qofkaas si aysan hadhowdi ugu soo kicin, khaasatan dhalinyarada iyo caruurta waa in laga daaweeyaa.

Qofku ma ka bogsoodaa qaaxada (tiibishada)?

Haa! Qaaxada waa laga bogsoodaa.waxayse qaadataa muddo dheer, waana muhim in daawada dhan la qaato ayadoon la kala joojin. Waayoo waxaa dhici karta haddaadan sidaa yeelin inay kugu dhacdo bakeeteriyada is-difaacda oo daawadu karin (waa bakteeriyo awood u leh inay la dagaalanto benciliinka).

Waa maxay asal raaca ama raadinta meeshuu ka yimi cudurka?

Markii qof laga helo tiibishada mar kasta waxaa la baaraa meeshu ka soo qaaday cudurka, si loo helo qofkii cudurka laga soo qaaday. Marka koowaad waxaa laga bilaabin dadka uu qofku la noolaa, marka labaad dadkuu la xiriiri jiray oo ay marar badan is-la xiriireen. Baaritaanku wuxuu noqon karaa in oogada qofka la baaro ama in raajo la saaro. Asal raacu waa wax wanaagsan sababtuna waxay tahay waxay yaraynaysaa faafitaanka cudurka. Xeerka u yaal dowladda iswiidhan ee ah xeerka is-qaadsiinta cudurada faafa waxaa waajib ku ah



Mas 2

kan cudurka qaba iyo qofka loogu yeeray baaritaanka inay u hoggaansanaadaan xeerka.

Side loo baaraa qaaxada (tiibishada)?



Mas 3

Teberkulin ama PPD – baaris , waa baaris haraga qofka la baarayo, qofka waxaa lagu dura irbad wadata ukun bakteeriyada tiibishada. Hadduu qofku qabo tiibisho, lagu daartay ama iska talaalay tiibisho waxaa ka dhalanayaa fal ah inay bararto meesha lagu duray irbadda. Ka dibna waxaa la cabira inta ay la`eg tahay meeshu, halkaaso laga garan karo qofka haduu cudurka qaaday, ama la kulmay dad qaba.

Waa maxay bakteeriyada tiibishada ee aan lagu dili Karin daawada bensiliinka?

Waxaa la yiraahdaa bakteeriyada tiibishada ee aan lagu dili Karin ama lagu daaween Karin daawada tiibishada ee ah antibiyootik.

Bakteeriyadaan waxay iska difaacdaa daawooyinka ugu muhimsan ee la dagaalanka bakteeriyada tiibishada ee

kala ah isonizid iyo rifampicin. Iswiidhan kuma badna bakteeriyadaas.

Qofku ma iska talaali karaa tiibishada?

Waxaa jira talaal loo yaqaan Bacille Calmette Guerin-(BCG). Kaama reebayso inuu kugu dhaco cudurka tiibishada, laakiinse waxay kaa ilaalinaysa nooca ugu khatarsan ee tiibishada. Waxay aad wax tar ugu leedahay dhalaanka kuwaaso ay ku dhici karaan cuduro halis ah, sida hurgunka maskaxda iyo dhiigga-sumooba. Wadamada laga helo cudurkaan waa khasab in la talaalo ilmaha, taasoo yareen karta dhimashada caruurta. Iswiidhan waxaa la talaala ilmaha looga yaabo inay la kulmaan dad qaba tiibishada ama la kulma qarabada qabta cudurka, sidoo kale u safri kara meelaha ay ku badan tahay cudurkaan.

Masawirka meesha laga keenay: Mas 2 iyo Mas 3
Waxaan ka soo xogsanay laanta caafimaadka Stockholm ee cudurada faafa.

Bild källa: bild nr 2 och bild Nr 3
"Smittskyddsenheten Stockholms läns landsting"

Qoraalada ay qorteen kooxda caafimaadka soomaaliyeed

1-Buuga waalidka-
oo ka hadlaya inaan la dilin ilmaha.
2-Xiriirka aadamaha
Oo ka hadlaya galmada iyo wada noolaan shaha
3-Qoraalka gudniinka
Oo ka hadlaya gudniinka dumarka
4-Isticmaalka galka
Oo ka hadlaya sida loo isticmaalo galka
5-Qoraalka"ma ogtahay"
Oo ka hadlaya Hiv/aids
6- ilaalada Hiv-ka
oo ka hadlaya Hiv/aids
7- qoraalka ilmaha gacanta lagu dhigo
waa qoraal ka hadlaya ilmaha ay gacanta ku dgigaan
gargaarka bulshada
8- qoralka cudurka dhimirka
waa qoraal ka hadlaya cudurka dhimirka
9- qoraalka cudurka qaaxada
10- qoraalka ma og tahay ee ku saabsan HIV-ka

Tuberkulos
Qaaxada TBC
Email: sht.gibril@telia.com
Or visit our website: www.sht.bz
This pack is translated by Gibril M.
consulted with Dr Amina Ali (Bakado)
Somali Health Team

Bild källa: bild nr 2 och bild Nr 3
"Smittskyddsenheten Stockholms läns landsting"